# GEEDI-SOCODKA DIB-U-DEJINTA QAXOOTIGA SAN DIEGO

COUNTY OF SAN DIEGO HHSA HEALTH AND HUMAN SERVICES AGENCY

LIVE WELL SAN DIEGO

Qaxootigu marka ay yimaadaan San Diego - waxaa qaabila mid ka mid ah afarta Hay'adaood ee Dib-u-dejinta maxalliga ah (RAs) si ay u helaan Qaabilaad iyo Adeegyada Meeleynta.

Hay'adaha Dib-u-dejinta (RAs) ayaa hubiya in baahiyaha aasaasiga ah la daboolo, oo aqoonta iyo xirfadaha la dhiso si ay macaamiishu u xoojiyaan helitaanka shaqo, la qabsashada nolosha Mareykanka, iyo noqoshada qof isku-filan. (30-90 maalmood oo taageero)

Inta lagu jiro 30-ka maalmood ee uugu horreysa imaanshaha, Qaxootigu waxay helaan baaritaano iyo adeegyada caafimaadka Barnaamijka Qiimaynta Caafimaadka Qaxootiga.

Qoysaska carruurtu weheliso waxaa loo gudbiyaa degmada San Diego si loo siiyo kaalmada dawladda oo ay ku jiraan kaalmada dhaqaale (CalWORKs) (ilaa 48 bilood oo adeeg ah), caymiska caafimaadka (Medi-Cal), iyo kaalmada nafaqada (CalFresh).

Qaxootiga u-qalma barnaamijka Samafalka Shaqada CalWORKS (WTW) waxaa loo gudbiyaa bixiyeyaasha adeegga Degmada ee shaqaaleynta. Kuwa aan u-qalmin Samafalka Shaqada CalWORKS (WTW), ama kuwa iskood isku gudbiya oo aan la saacidin waxay sidoo kale u-qalmaan adeegyada ilaa 60 bilood laga bilaabo maalinta ay wadanka soo galaan.

Qoysaska aysan wehelin carruurtu waxaa loo gudbiyaa Wilson Fish (WF). Wilson Fish (WF) waxay bixiyaan adeegyada shaqaaleynta, adeegyada bulshada iyo isdhexgalka, iyo maareynta kiisaska (ilaa 60 bilood oo adeeg ah) - oo ay weheliso Kaalmada Lacageed ee Qaxootiga ilaa 8 bilood.

Kiisaska halka qof ama labada qof ah oo aysan carruuri wehelin waxaa loo gudbiyaa Degmada San Diego si loo siiyo kaalmada dawladda oo ay ku jiraan caymiska caafimaadka (Medi-Cal), iyo kaalmada nafaqada (CalFresh).

**Hay'adaha Dib-udejinta Degmada San Diego**

- Alliance for African Assistance
- Catholic Charities Dioceses of San Diego
- The International Rescue Committee, Inc.
- Jewish Family Service, Inc.

**Samafalka Shaqada Degmada San Diego/Bixiyeyaasha Adeegyada Shaqada ee Qaxootiga (RES)**

- Deegaanada Koonfur, Beri, Bartamaha iyo Bartamaha-Waqooyi: Public Consulting Group (PCG)
- Deegaanada Waqooyi: ResCare, Inc.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan adeegyada qaxootiga ee laga helo San Diego, booqo Madasha Qaxootiga San Diego:** www.sdrefugeeforum.org

Degmada San Diego, Hay'adaha Waxqabadka Bulshada: http://www.sandiegocounty.gov/hhsa/programs/sd/community_action_partnership

# DEGMADA SAN DIEGO
# ADEEGYADA SHAQAALEYNTA QAXOOTIGA
# GUUDMAR

COUNTY OF SAN DIEGO HHSA HEALTH AND HUMAN SERVICES AGENCY

LIVE WELL SAN DIEGO

**Adeegyada Shaqada ee Qaxootigu (RES) waa barnaamij loogu tala galey si loo caawiyo qoysaska qaxootiga ah ee u-qalma si ay u gaaraan isku-filnaansho nololeed. Adeegyada Shaqada ee Qaxootiga (RES) waxaa bixiya Degmada San Diego, Laanta Waxqabadka Bulshada (CAP) ee Hay'adda Adeegyada Caafimaadka iyo Dadweynaha.**

## Yaa u-qalma Adeegyada Shaqada ee Qaxootiga RES?

- Ka qeybgaleyaasha kaalmada dhaqaale (CalWORKS) ee Shaqada diyaarka u ah iyo qaar ka mid ah shaqsiyaadka kaalmadu ka dhammaatay kuwaasoo xaaladdooda socdaal tahay Qaxootinimo, Magangelyo-doon, Soo-galeyaal Kuubaan ama Haitaan ah, Dhibaneyaasha Kala-waaridida iyo Fal-dembiyeedyada.

- Adeegyada loogu talagalay qaxootiga waa ilaa iyo 60 bilood laga bilaabo maalinta ay soo galeen Mareykanka.

## Waa maxay adeegyada kale ee lala Bixiyo Adeegyada Shaqada ee Qaxootiga (RES)?

- Dhammaan adeegyada la bixiyo iyadoo la marayo Adeegyada Shaqada ee Qaxootiga (RES) waa kuwo la xiriira shaqada si ay u horseedaan meeleyn iyo ku-nagaasho shaqo.
- Afarta qaybood ee waaweyni waa: Shaqaaleynta (naadi shaqo, siminaaro aqoon-isweydaarsi xirfadeed, tababar shaqo, raadinta, gudbinta iyo meeleynta, tababarka xirfadeed), tababarka luqadda Ingiriisiga (oo ay ku jiraan tababarka xirfadeed), maaraynta kiisaska, iyo kuwa kale (adeegyada gudbinta iyo macluumaadka, tarjumaadda, is-dhexgalka).

## Waa maxay Barnaamijyada ay CAP siiso Qaxootiga?

- EMASS–Waa barnaamij diiradda saaraya dadka waaweyn ee qaxootiga ah waxaana ka masuula in ay bixiso Ururka Shaqaalaha Aasiyaanka (UPAC) si loo bixiyo wacyigelin, taageerada la-talinta aasaasiga, isku-xirka bulshada iyo adeegyada bulshada, isdhexgalka, iyo yaraynta go'doomida.
- Xirfadda Ingiriisiga-Luuqad Labaad Ahaan (VESL) –Waa xirfad luuqadeed iyo barnaamij diiradda saaraya shaqaaleysiinta, waxaana ka masuula in ay bixiso hay'adda IRC taasoo ka taageerta qoysaska qaxootiga helidda xirfadaha lagama-maarmaanka ah si ay u helaan shaqo sida ugu dhakhsaha badan ee ugu macqulsan ayna u horumarin lahaayeen qorshe ay sare ugu qaadayaan shaqadooda, si ay u shaqeystaan saacado dheeraad ah, una helaan mushaar fiican si ay u gaaraan isku-filnaansho.
- Suuqa U-diyaarsanaanta Shaqada (WRE) -Waa tababarka u-diyaarsanaanta shaqada, waxaana ka masuula in ay bixiso Xarunta Xallinta Khilaafaadka Qaranka (NCRC) si loo baro ka qeybgalayaasha xeeladaha maaraynta khilaafaadka, xirfadaha wada xiriirka, iyo xirfadaha nolosha ee shaqada la xiriira. WRE waxay baraan caadooyin tayo leh si qofku u noqdo shaqaale wanaagsan, waxay dhisaan kartida bulshada qaxootiga ah si loo yareeyo khilaafaadka, looga fogaado rabshadaha iyo abuurida bulsho caafimaad-qab ah.

## Ma jiraan Adeegyo Aanan ka aheyn Kaalmada Dawladda ee loogu talagalay Qoysaska Qaxootiga ah?

Hay'adaha Dib-u-dejintu waxay dooran karaan inay qaxootiga ku qoraan barnaamijka Deeqaha Isku-dhafan halkii ay u diri lahaayeen Degmada San Diego ama Wilson-Fish. Barnaamijka Deeqaha Isku-dhafan wuxuu bixiyaa adeegyo dib-u-dajin oo balaaran oo awood u siinaya qaxootiga in ay gaaraan isku-filnaansho dhaqaale iyada oo aan la helin kaalmada lacagta dawladda. Barnaamijkani waxaa laga yaabaa in uu qoka ka hor istaagi karo Kaalmada Lacagta ee Qaxootiga (RCA) ama kaalmooyinka lacagta ee dawladdu bixiso ugu yaraan afarta bilood ee uugu horeysa laga bilaabo maalinta uu wandanka soo galey ama maalinta uu u-qalmo.

Adeegyada waxaa la bixiyaa ilaa 180 maalmood oo uugu horaysa, laga bialaabo maalinta uu wadanda soo galey.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan adeegyada qaxootiga laga bixiyo San Diego, booqo Madasha Qaxootiga San Diego:** www.sdrefugeeforum.org
Laanta Waxqabadka Bulshada ee Degmada San Diego:
http://www.sandiegocounty.gov/hhsa/programs/sd/community_action_partnership